

## Saro u qaadida helitaanka daawooyinka cudurada Dhif iyo Naadirka ah

Diiseembar 05, 2024 [Su'aalaha warbaahinta](#)

Dowlada Alberta waxay balaarinaysaa helitaanka dawooyinka cudurrada Dhif iyo Naadirka ah, iyadoo dhisaysa caymiska dhammaystiran ee daawooyinka.

Boqolaal cudur ee dhif iyo naadirka ah ayaa hadda ka jira Canada oo dhan, kuwaas oo saameeya nolosha dad badan oo reer Alberta ah. Iyadoo boqolkiiba in yar oo ka mid ah xaaladahaas la heli karo daawayntooda, dadka reer Alberta ee la nool cudur dhif iyo naadirka ah ayaa inta badan leh ikhiyaaro xaddidan ama aan la awoodi karin.

Dowladda Alberta waxay aqoonsan tahay muhiimada ay leedahay bixinta daawaynta ugu waxtarka badan, ee la heli karo ee suurtogalka ah, waana sababta in ka badan \$130 milyan loogu kharash gareeyay dawooyinka cudurada dhif iyo naadirka ah ee sanadka 2023-24.

Si loo dhiso maalgashigan oo loo balaariyo caymiska guud ee cudurrada dhifka ah ee Alberta, oo ay ku jiraan in ka badan 100 daawooyin ah, dawladda Alberta waxay heshiis laba geesood ah la gashay dawladda federaalka ee hoos timaada Istaraatijiyyada Qaranka ee Dawooyinka ee Cudurrada Dhif iyo Naadirka ah.

Sida ku cad heshiiska, Alberta waxay heli doontaa ku dhawaad \$54 milyan sanadkii mudo dhan seddex sano oo loogu talagalay dawooyinka cudurada dhif iyo naadirka ah iyo kuwa soo baxaya, iyo sidoo kale ogaanshaha iyo baaritaanka.

"Helitaanka dawooyinka cusub ee casriga ah iyo dawooyinka muddada dheer la xaqiijiyyay waa hab muhiim ah oo lagu taageero dadka reer Alberta ee la nool cudurrada dhif iyo naadirka ah.

Maalgelintani waxay saro u qaadi doontaa dadka reer Alberta inay helaan daaweynta suurtogalka ah ee wax ka beddelaya nolosha iyadoo la adeegsanayo barnamijiyada horay uga sii jiray gobolka."

*Adriana LaGrange, Wasiirka Caafimaadka, Dowladda Alberta*

Daawooyinka cusub ee ugu horreeya ee lagu bixiyo Alberta waa Poteligeo, oo loogu talagalay daawaynta cudurka Sézary, nooca kansarka ee saameeya maqaarka iyo dhiigga; Oxlumo waxaa loogu talagalay daaweynta cudurka loo yaqaano nooca 1-aad ee hyperoxaluria, taas oo keeni karta dhagxaanta kelyaha iyo dhaawaca kelyaha; iyo Epkinly oo loogu talagalay daaweynta unugyada B ee

lymphoma, taas oo saameyn doonta xubno dhowr ah oo ay ku jiraan beeryarada, xameetida ama dhuuxa lafta.

Sida cudurada dhif iyo naadirka ah, Cudurka Sézary wuxuu saameeyaa 1 qof 10-kii milyan ee qof sannadkiiba, hyperoxalurias-ka aasaasiga ah ee nooca 1-aad wuxuu saameeyaa in ka yar 3 qof 1-kii milyan, iyo unugyada waaweyn B ee lymphoma wuxuu saameeyaa qiyaastii 7 qof 100,000 qof sannadkii. Marka lagu daro liiska daawoooyinkan, ku dhawaad 30 reer Alberta ah ayaa u qalmi doona daawoooyinkan sannadkiiba.

Iyada oo qayb ka ah heshiiska, ilaa 10 boqolkiiiba maalgelinta ayaa loo isticmaali doonaa si loo horumariyo baarista iyo ogaanshaha cudurrada dhif iyo naadirka ah ee Alberta, oo ay ku jирто Barnaamijka Baarista Dhallaanka ee Alberta. Barnaamijka waxaa dhawaan ballaarisay dowladda Alberta si loogu daro afar xaalandood oo cusub, taasoo ka dhigeysa tirada guud ee xaalandaha dhallaanka ee la baarayo 22.

Balaarintii hore ee dawladu ku samaysay Barnaamijka Baarista Dhallaanka ee Alberta waxay ka dhigtay mid ka mid ah kuwa ugu dhamaystiran ee Canada waxayna ka dhigtay Alberta oo ah gobolkii ugu horeeyay ee lagu baaro cytomegalovirus ee lagu dhasho, argininosuccinic aciduria, guanidinoacetate methyltransferase deficiency iyo mucopolysaccharidosis nooca 1-aad.

### Xaqiiqooyinka kooban

- Bishii Maarsa 2023, dawladda Canada waxay ku dhawaaqday Istaraatijiyyadda Qaranka ee Dwoooyinka ee Cudurrada Dhif iyo Naadirka ah.
- Iyadoo la marayo istaraatijiyyad, ilaa \$1.4 bilyan ayaa muddo saddex sano ah ayaa heshiis labo dhinac ah lagu siin doonaa gobollada iyo deegaanada.
- Iyadoo loo marayo Istaraatijiyyadda Qaranka ee Dwoooyinka loogu talagalay Cudurrada Dhif iyo Naadirka ah, qiyaastii \$162 milyan saddexda sano ee soo socota ayaa la bixin doonaa si loo taageero helitaanka dwoooyinka cusub ee cudurrada Dhif iyo Naadirka ee liiska lagu heshiiyey, daawaynta waxtarka leh ee jirta, iyo baaritaanka hore iyo ogaanshaha cudurrada dhif iyo naadirka ah.

### Macluumaadka la xidhiidha

- [Istaraatijiyyada Qaranka ee Dwoooyinka ee Cudurada Naadirka ah](#)
- [Xaashida xaqiqa ee Barnaamijka Dwoooyinka Cudurada Dhif iyo Naadirka ah ee Alberta](#)



War saxaafadeed

Su'aalaha warbaahinta

Jessi Rampton

587-357-3729

Xoghayaha Warfaafinta, Caafimaadka